HORUMARINTA DHALINYARADDA ®
SI SAXO LEH U NOOLAANSHAHA
XIL ISKA SAARIDA BULSHADA

**YMCA da ku yaal Agagaarka Magaalooyinka Mataanaha ah**

**WARQAD U SAMEYNTA QORSHAHA QIIME U GAAR AH CID WALBA**

Magaca ____________________

Telefoonka ____________________

## Habraacyada Xaqiijinta Dakhliga

Codsade kastaa waxa uu u baahan yahay inuu keeno nuqul ah canshuurta1040 ee ay xareeyeen sannadka markaa lagu jiro (waa hadii la xareeyey) iyo wixii kale ee dukumiintiyo ah ee cadeynaya wixii gargaar ah ee ay helaan. Qof kasta oo qoyska ka mid ah oo weyn oo shaqeeya waxaa laga rabaa in uu ka keeno foomka canshuurta uu xareeyey sanadkaa hadii uu kaligii xareystay iyo hadii aad cid uu la xareystayba. Hadii dakhliga ku soo galaa ee canshuurta aad xareysay uu si cad u muujinayo xaaladaadda dhaqaale ee hada, kolkaa taasi waxa ay noqon dukumiintiga kaliga ee aad u baahan tahay inaad keento. Dakhliga guud ee ku soo gala ayaa la isticmaali xilliga la eegayo xaq- yeeladka. Hadii aan lagaa rabin in aad canshuur xareyso, ama aadan wali xareyn, waxaa lagaa rabaa in aad ugu yaraan keento (ama aan ku koobnayn) 2 dukumiinti oo sheegaya qiyaastii dakhliga ku soo gala sannadkii, gargaarada dhaqaale iyo cadeyn ah cida aad mas'uulka ka tahay.

## Dakhliga & Gargaaradda Dhaqaale

| | |
|---|---|
| Ma xareysay canshuurta dowladda Dhexe? | Haa______Maya______ [Ogow: Akhbaartan cidna lala wadaagi maayo.] |
| Qof kale oo canshuurta kugu xareystaa ma jiraa? | Haa_____ Maya_____ |
| Ma qaadataa Gargaar Ilmood ama masaariif? | Haa____ Maya_____ |
| Ma qaadataa wax Gargaar Dowladeed ama Cayr ah ? | Haa____ Maya_____ |
| Ma qaadataa Lacagta SSI da ama SSDI ee Bil walba la bixiyo? | Haa____ Maya___ |
| Ma qaadataa Lacagaha Waayeelka aan shaqeyn la siiyo? | Haa_____ Maya____ |
| Ma qaadataa Lacagta cidii shaqo la'aan ah la siiyo asbuucii? | Haa_____ Maya_____ |
| Ma qaadataa wax kale oo gargaar dhaqaale ah bil walba? | Haa____Maya_____ |
| Hadii aad haa tiri, Waa maxay ilaha dakhligaasi kaa soo galaa | |

Hadii aad haa ku calaamadisay mid ka mid ah su'aalaha kor ku xusan, kolkaa waxaad u baahan tahay inaad u hesho foom la aqbali karo oo lagu xaqiijyo dakhliga.

Fadlan ka eeg dhinaca kale ee boggan foomamka la aqbali karo ee lagu sugo dakhliyada.

Fadlan ogow hadii aad xareysay canshuur aysana canshuurtaa la xareeyey si cad aysan ugu cadeyn dakhligaagu hadda, waxaad kolkaa u baahan tahay in aad keento qoraalo cadeynaya dakhligaaga. Cadeynta ah cida aad mas'uulka ka tahay waa la iska rabaa.

18-MS29

## CADEYMAHA KU SAABSAN XAQIIJINTA DAKHLIGA & GARGAARADA DHAQAALE

Keen nuqul dukumiintiyada canshuur celinta dowlada dhexe (1040) (foomamka gacanta lagu qoro lama aqbalayo)
Dukumiintiyada la kala dooran karo ee la ogol yahay ee canshuur celinta dowladda dhexe waa: (1040, 1040A, 1040EZ, 1040NR, 1040X, ama 1040 Schedule C)
AMA
Keen ugu yaraan 2 foom oo xaqiijinaya dakhliga: (Mid ka mid ah labadda foom waa khasab in uu cadeeyo cadadka dakhliga ah ee soo gala qoyska oo dhan)

1. Dakhliga Sooshal Sakuuriyga [Social Security Income] (SSI) ama Dakhliga dadka Naafada ah la siiyo ee Sooshal Sakuuriyga [Social Security Disability Income] (SSDI)
2. Gargaarka Dowlada (MFIP) – Tusaale ahaan: cuntada, deeqaha, amaahaha, lacagta cadaan ah, ka gargaarida kirada iyo haynta ilmaha
3. Cadeynta Qaadashada Lacagta Shaqaalaha Baagamuudadda ah la siiyo.
4. Warqad shaqo ka eryid
5. Dabada Jeegta qof walba oo shaqeeya oo qoyska ka mid ah (4 asbuuc) sheeg celceliska asbuucii si aad u cadeyso wixii isbedel ah ee jira ee ka duwan waxa ku qoran dukumiintiga canshuur celinta
6. Iskaa-u Shaqeysiga: dakhliga (1040) ee ku qoran (Schedule C) ama oraahda dakhliga ku soo gala sedexdii biloodba. Dakhligaa inta aad waxba laga jarin
7. Warqad ka socota MN Care ama (Medical Assistance [MA]) oo sheegaysa cida xaqa u leh ama haysata iminka kaararkaa (Sawirka kaarku ma aha dukumiinti la aqbali karo)
8. Dukumiinti cadeynaya ku jirid Guri Dowladeed ama meelaha dadka buka ama waayeelka ah lagu hayo.
9. Xaq u yeeladka qadada jaban ama lacag la'aanta ah ee dowladu bixiso ee ilmaha iskuuladda dhigta la siiyo.
10. Lacagaha Waayeelka aan shaqeyn ama hawlgabka ah la siiyo
11. Dakhliga Gargaarka Ilmaha & bixinta Masaariifta
12. Warqad bangi oo cadeynaysa ilaha dakhligu kaa soo galo (ugu yaraan 3 bilood)
13. Warqad sheegaysa Xaaladaadda Dhaqaale oo lagala yimaado urur ka war haya heerka gargaarka dhaqaale ee codsadaha, tirada dadka iyo daruufaha qoyska. Waa inuu noqdaa dukumiintigaasi mid urur magaciis kor kaga qoran yahay, mana soo qori karo dukumiintigaas qofka ehel ama saaxiibka ah, ama ka tirsan YMCA da. Tan looma baahna inta badan hadii aan loogu baahan cadeyn labaad ahaan awgeed.
14. Qaybta kharashka nolosha ee amaahda ardayda

   Hadii wax dakhli ah oo hada la cadeeyn karaa uusan jirin, ama dakhli la'aani jirto ama dukumiintiyada aan dakhli ahaan loo ansaxin uun la hayo, kolkaa deeqda Qorshaha Qiime Gaar Sameynta lama sameyn karo.

## CADEYNTA CID AAD MAS'UUL KA YAHAY KORINTEEDA

Keen ugu yaraan1 dukumiinti oo xaqiijinaya cidda aad mas'uulka tahay:

1. Cidii mas'uul laga yahay ee ku qoran dukumiintiyada la ansaxiyey ee canshuur celinta dowladda dhexe (1040)
2. Warqada Barnaamijka qadada jaban ama lacag la'aanta ah ee ilmaha iskuuladda dhigta la siiyo.
3. [Social Security Income] (SSI) ama Dakhliga Naafada ee Sooshal Sakuuriyga [Social Security Disability Income] (SSDI): Manfaca waxaa loo dhiibaa waalidka laakiin ilmaha magaciisuna waxa uu ku qoran yahay isla dukumiintigaa.
4. Warqad laga keeno Mulkiilaha Guriga kirada ah leh.
5. Cadeymo ku saabsan Kaalmada Dowlada laga helo oo ay ku qoran yihiin tirada inta qof ee Qoysku ka Kooban yahay.
6. Cadeyn ama warqad sheegaysa cida xaqqa u leh ama ku jirta MN Care ama Medical Assistance (MA) oo ku nool isla ciwaanka waalidka ama mas'uulka (Sawirka kaarku ma aha dukumiinti la aqbali karo)
7. Hadii ilmahu ay guriga ku qoran yihiin oo loo aqoonsan yahay in ay qoyska la nool yihiin.
8. Oraahda Masaariifta ilmaha oo cadeynaysa inta lacagta ah ee la bixiyo, la qaato, ama cadeynsa 50% haynta ilmaha. (hadii ilmaha aan canshuurta lagu xareysan sannad walba kolka canshuurta la xaresysanayo.)
9. Kaarka War bixinta Iskuulka oo ay ku qoran yihiin magaca waalidka iyo magaca ilmaha
10. Wareejinta Xaquuqda Waalidka oo naataayeysan ama dukumiinti sharci ah
11. Dukumiinti Sharciyeysan oo cadeynaya Heshiis ku saabsan Haynta Ilmaha ama dukumiinti saxiixsan oo uu kor kaga qoran yahay magaca dhex-dhexaadiye.
12. Cadeymo sheegaya Korshasho ama Gacan ku hayn ilmood (khidmada ilmaha lagu hayo (GA) waa in lagu daro dakhliga guud)
13. Warqad laga helo qofka maxkamadu u magacowdo dhowrida maslaxada ilmaha (Guardian ad Litem) ee la shaqeynaya qoyska.

## Ilaha Laga Heli Karo Cadeymaha

1. Shabakada (website) Sooshal Sakuuriyga (Social Security) si aad magacaagga u geliso - www.ssa.gov
2. PDF ka canshuuraha - www.irs.gov
3. Cadeyn ka qaadashada dowladda cayr, ama cunto ama lacag cadaan ahba - www.ebtedge.com